


Ku Soo Dhowaada Plymouth

Bulsho wacan oo lagu nolaado qoysaskana lagu dhaqdo.

Waxaa soo diyaariyey,

Waaxyada Boliiska iyo Dabdamiksa ee Plymouth,
Super Target,
Applebee's,
iyo santuuqa Karhortagga Dambiyada iyo Dabka ee
Plymouth

“Nolosha Ladnaan Lagu Daro”




*Farriin ka socota Taliyaha Boliiska
Michael S. Goldstein iyo Taliyaha
Dabdamiska Richard C. Kfine,*

Waaxda Boliiska iyo Waaxda Dabdamiska, iyo Santuuqa Kahortagga Dabka, Super Target, iyo Applebee's waxay si haybad leh diyaar ugu yihinn inay kuu adeegaan. Ujeedadeena ayaa ah inaan ku siino barnaamijyada suurtagalka ee kahortagaya dambiyada, dabka iyo barnaamijyada nafta lagu badbaadiyo ee jaaliyadda la siiyo.

Bugaan yar wuxuu dusha ka maraayaa talooyin, qaanuuno muhiim ah ee ku saabsan Magaalada, iyo barnaamijyo ah sida wax looga hortago. Waxaan kugu guubaabinaynaa inaad soo booqatid shabakada interneta ee Magaalada oo ah www.ci.plymouth.mn.us si aad wax badan uga baratid barnaamijyadeena.

Waxaan idinku mahadcelinayaa caawimaada aad noo fidisay si ay Plymouth u noqoto jaaliyad amman leh ee lagu noolado reerkana lagu dhaqdo.

Wadashaqayntu waxay dhalisaa horumar la taaban karo.



WAXYAABO MUHIIM OO KU SAABSAN MAGAALADA PLYMOUTH

Wac 9-1-1 marka aad Gargaar u Baahantahay

Telefoon lambarka 9-1-1 waxaa loo sameyay inaad si sahlan kula xiriirtid boliiska, dabdamiska, iyo adeegyada degdegga ee caawimaada caafimaadka.



Marka aad ka soo wacaysid telefoonka caadiga, an ahayn mobaylka, xiriiryaasha 9-1-1 way ogyihiin meesha aad ka soo wacaysid. Haddaad ayaga aadan la hadli karin, waxay durdabiida meesha aad deganatahay ay u soo dirayaan boliiska, dabdamiska, ama birmadka caafimaadka.

Wac 9-1-1 si aad:

- Marka ay jirto xaalad degdeg ah.
- La soo diro aambalaas caafimaadka ka caawisa.
- Soo sheegtid dembiyo ama falal dulmi socda.
- Soo sheegtid xaalad ay qusayso boliiska.

Wac lambarka aan degdegga ahayn ee Boliiska ama Dabdamiska si aad:

- Koobiga warbixinta boliiska ama dabka.
- Waydiisid su'aalo caadi ee ka baxsan boliiska, dabdamiska ama waaxda caafimaadka.
- La hadashid qofka u xilsaaran kiis ama shil horay u dhacay.

Marka aada wacaysid 9-1-1 si buuxda u sharax falalka aad ogtahay ay kamid yihi:

- Warbixin buuxda waxa meesha ka socda.
- Halka ay falalka ka dhacayaan.
- Ka waxbixinta shaqiga (jinsiga, da'da, dharka, timaha, dhererka, midabka, magaca, iyo wax kastoo lagu aqoonsando.)
- Warbixinta ku saabsan gaariga (magaca, nooca, midabka, taargada, calaamad gaariga uu leeyahay iwm.)
- Jahaduu aaday eedaynaha, haddu tagay.

763-525-6210 Lambarka Boliiska aan Degdegga Ahayn
763-509-5120 Lambarka Dabdamiska aan Degdegga ahayn, Isniinta-Jimcada: 8:00-4:30 Galabnimo

Ammaanka Aaladaha Qaaca Sheega

Ammaanka aaladaha qaaca sheega waxey ku shaqeyaan koronto sheegta hadduu ka jiro qaac ama dab ee qolkaaga, guriga ama meesha shaqada. Shanqarta dheer waa digniinta hore ee reerkaaga siiya fursad ay guriga nabad uga baxaan. Baro nooca shanqarta ee aaladaha ammaanka qaaca oo waxaad bartaa reerkaga inay dibadda u baxaan marka ay maqlaan. Dhawaaqa dhuuban waa calaamadda bateriga laciifay.



- Aaladaha qaaca ee bateriga ku shaqeyaa waa in sanadkiiba mar bateriga laga badalo.
- Aaladaha qaaca sheega waa in bishiiba mar la tijaabiya oo wasaqda laga qaado.
- Hadday aaladaha qaaca sheega ay dhawaaqaan guriga ha laga baxo hana la galo meel horay loo sameyay.
- Dabaq waliba ee guriga waxaad ku rakibtaa aaladaha qiqa ka diga iyo meelaha ka baxsan qolaalka jifka.

- Marna faragalin ha ku samaynin dhawaaqa aaladda qiiqa ka digta. Waa dhawaaqqas waxa digniin ku siinaya.
- Wac 9-1-1 hadday jirto xaalad degdeg.

Samee Qorshe Looga Baxo Guri Uu Dab Qabsado

- U deji qaanuun dhaahaya qolalka jifka oo idil “sigar laguma cabi karo”
- Samayso meel lagu kulmo ee guriga baxsan halkaaso uu qofwaliba aadi karo markay jiraan xalaado degdeg ah.
- Reerka oo dhan bar dhawaaqa aaladaha sheega qiiqa. U sheeg inay guriga ka baxaan marka uu jiro dhawaaqaan ayna tagaan meel lagu horay loogu heshiiyay.
- Calaamayso labada siyaabood oo qolka looga baxo. U xilsaar qof caawiya caruurta, waayeelka, ama shaqsiyaadka qaba itaaldarri sida ay guriga uga baxaan.
- Marka uu qaaca jiro gurguuro. Hadduu dharkaaga dab qabsado, joogso, dharka tuur kaddibna galgalo.
- Marna ha yeliin inuu qof uu ku laabo qofka qiiqa leh ama gubanaya sabab kasta oo jirta.
- Bar caruurta inaysa meelka ku dhumaan marka uu dab dhaco ama gurdmadka dabka.
- Haddaad qol aad ku xayirantid, daaqadda ka taag calan ama maro ifaysa, iwm, si lagu arko. Muraayadda ha jabinin, waxaa dhici karta inuu qaaca ama dabka ay qolka dibadda uga soo galaan.
- Seexo albaabada oo ay kuu xiranyihiin.
- Wac 9-1-1 haddaad gurmada u baahatid.



Ammaanka Shumaca

Shumaca waxay sabab u yihiin khasaaroyin malyuumaad ah oo soo gaara guryaha Maraykanka sanad waliba. Caruurta ku ciyaarta shumaca, shumaca meel lagu iloobo, ama shumaca looga tago meel ay dab qabadsiiin karaan.



- Markasta caruurta ka fogee taraqa iyo sigaarshidaha.
- Liifadda shumaca gaabi 1/4” kahor inta aadan isticmaalin.
- Meelna shumac shidan ha uga tegin.
- Ha saarin shumaca miiska geeskiisa ama meel uu si ama filaan uga dhici karo.
- Ka fogee shumaca buufinta, meelo haso leh ama wixii dabka soo jiidan kara.
- Dami liifadda shumaca marka ay u jirto 2” salka waxa haya.
- Markasta isticmaal wax ololka daahiya marka la gaaro salka shumaca.

Ammaanka Cunta Karinta

- Marna cunta karsamaysa ha uga tagin stoofka wax lagu kariyo.
- Meelaha cuntada lagu kariyo ka illaali waxa dab dhalin kara (sida maryaha digsiyada lagu qabto, shukumaanada, calallada, ama bokisyada cuntada qaada).
- Caruurta ka fogee meelaha cuntada lagu kariyo adigo u dajiya habka “meel caruurta aysan galin” saddex cagoodna u jirta istoofka.
- Dhar aan holof ahayn gasho marka aad cuntada karinaysid. Dharka holofka ah dabka ayaa qaban kara.
- Markasta wax digsiya lagu qabto hayso, sida wax goloyada ama waxa wax lagu daboolo. Weligaa golofya qoyan ha isticmaalin, biya kulul ayay ku gubi kartaa.

- Haddu dab yar ka yimaado digsa wax lagu karinayo, si aayar u dami adigoo daboolka ayaa uga qaada. Istofkana iska dami.
- Hadduu ofenka dab qabsado, dabka uga saar adiga oo iridda u fura si uusan dabka kuu gubin dharkaagana u qabsan.
- Hadduu maykroweefka dab qabsado iridda ha furin lakiin korontada meesha ka siib.

Tarraqa iyo Sigaarshidaha Caruurta Ka Fogey

- Tarraqa iyo sigaarshidaha caruurta ka fogee oo dhig meel aysan gaari karin iyo aysan arki karin, meel kore oo quful leh.
- Marna caruurta ha kula cayaarsiin oo hana ka dhigin wax lagu madadaasho. Way ku dayanayaan.
- Hadduu cunugaaga jeclaado waxa dabka la xiriira inuu ku cayaaro, si cad ugu sheeg inay waxaan yihiin kuwa dadka weyn.
- Caruurta bar inay qofka weyn u sheegan in haddii ay caruur kale ku arkaan tarraq ama sigaarshidaha inay qofka weyn u sheegaan.
- Haddaad ku tuhimaysid cunugaaga inuu wax gubo ama si weyn u jecel dabka iyo wax lamid ah wax ku caawiya raadso. La xiriir Waaxda Dabdamiska ama qoys ama lataliyaha si loo helo ilo ku caawiya.

Kuleyliyaha, Kulsiiyaha, iyo Ammaanka Dab-xeeran

- Kulaysiyaaha, dab-xeeranka, iyo shooladda, waa in sanadkiibaa mar uu eega nin xirfad u leh.
- Dhir cagaan ha ku shidn dabshidka ama istoofka qoryaha. Dhirta cagaaran waa mid qoyaan badan leh waxayna u badantahay inay aayar u gubtaan ayaagoon holac lahayn ayna meesha ku aburatno dheecaan badan.



- Kuleyliyayaasha qiyaastii ha u jiraan ilaa saddex cagood (ama hal miter) wax kasta oo guban kara.
- Kuleyliyayaasha gacanta lagu qaado waa inaad markasta damisid marka aad baxayo ama seexanayso.
- Kuleliyaasha gacanta lagu qaado ee batroolka isticmaala ku hay meelo nacaw fiican leh oo ka fogee meelaha leh holaca leh ama kuleylka.
- Marka aad kuleliyaasha aad iibsanaayd, iibso kuwa leh qalab isaga kaligii isdamaya.
- Iska hubso in kuleyliyayaasha batroolka isticmaala la dhigo meel nacaaw leh. Kuleyliyayaasha yaalla meel aan nacaw leheen sida qolalka jifka ama musqulaha waa inay ahaadaan kuwo yar oo ishaysta. Marna guriga gudihisa ha ku isticmaalin kuleliyaasha batroolka isticmaala oo leh haan.
- Inta aadan tuurin sug inta uu dambaska ka qaboobayo. Dambaska ku gur konteener macdan ah.

Carbon Monoxide (CO):

Dilaha aamusan

Carbon monoxide waxaa loo yaqaano dilaha aamusan. Lama arki karo, ursan karo, waa gaas aan mida lahayn marka uu jiro (sida batroolka, dhirta, dhuxusha, naftada, saliidda, ama gaaska kulaylaha) oo aan si buuxda u gubanin.

Guriga gudihisa, qalabka kulaylka iyo karinta oo isticmaala waa kuwa sida ugu weyn looga helo CO. Gawaarida shidan iyo motorada shidan ayagana waxay leeyihiin heer sare carbon monoxide.

- Marna istoofka ama dhuxusha wax lagu dubo ha u isticmaalin inaad guriga ku kululaysid.
- Gariga oo shidan ha uga tagin garash xiran gudihisa am mid furan.
- Gurigaaga gudihisa ku rakib shanqarta digniinta. Shanqarta digniinta CO ma ay badalayaan aaladaha digniinta qaaca. Aaladaha digniinta qaaca waa in lagu rakiiba dabaq waliba ee u yaala guriga ama meelaha la sexdo ama dibaddooda.
- Waa in kala bartaa faraqa dhawaaqa shankarta oo kala leeyihiin digniinta qiiqa iyo diigniinta CO.

- Dhammaan qalabka dabka isticmaala oo idil waa in sanadkiiba mar ay xirfad yaqaano eegaan.
- Marka aad duurka qarabax u aadid, waxaad isticmaashaa kubeerto iyo karbuuno iyo baabuurta guriga ah.

Ammaanka Dadka Guryaha Laga Ijaaro Deggan

- Weydiiso in halka furaha laga galiyo la badalo si aysan dadki horay u deggana aysan u dib u furan.
- Xarafka hore ee maga koobaad iyo kan dambe ku qor boostada ama halka lambarka qolkaaga laga soo yeeriy.
- Marna qof qalaad ha ka yeelin inuu meesha soo galo.
- Qofna ha yeliin inaad dhismaha soo galisid ilaa aad ka habsatid cidda uu yahay. Qof ku dhahaya dariska ayaan u socda ha yeelin oo ha soo galinin. Waxy u badantahay inay yihiin dad ku qiyaamaya.
- Weligaa albaabka ha ka furin qofaadan aqoonin.
- Albaabada hore ha balaqin.
- Weligaa cidna ha siin koobiga furaha guryaha aad degantahay.
- Markastaba albaadaada guriga iska xir haddaad guriga joogtid iyo haddaad ka maqantahay. Ammaanka guriga ha ku halleynin silsiladda albaabka gudaha looga xiro.
- Wac 9-1-1 marka aad aragtid wax qaldan ama shaki ku galiya. U sheega ninka guriga ijaara arrimahaan.
- Ijaarka guriga iyo kharashyada kale ha ku bixinin lacag caddaan ah. Markasto waxa aad bixisid weydiiso in rasiid lagu siiyo.
- Iska jir wiishka iyo agagaarkooda. Haddad qof aad ka shakisid sug ashensooraha kale.

Ammaanka Ku Taxluuqa Guriga

- Albaabada iska xir markasta haddaad joogtid iyo haddaad maqantahay.
- Albaabka ha ka furin dad aadan aqoonin.
- Wac 9-1-1 marka aad aragtid falal dambiya ah iyo wax qaldan.
- Markaad guriga ka maqantahay qof rafiiq ah boostada, cowska, barafka ha ka qaado meesha aad guriga ka soo gashid.
- Gurigaaga ka dhigo mid markasto la gjoogo. Raadiyaha, nalka, TVga shid marka aad guriga ka maqantahay.
- Waxa qiimaha sida baaskillada iyo qalabka lagu jaro cawska meel xafidan ku quful.
- Geedaha iyo dhirta kale jar oo gaabi si aysan u noqon meel lag dhumaanayo.
- Albaabka weyn ee garaashka markasta xir.
- Nalalka iftimaa marka uu dhaqdhaqaaq jiro dibadda ku ifi.



Kahortagga Gaariga La Xado iyo Alaabta Gaariga ku Jirta



- Albaabada gaariga xir oo dariisahdahana kor qaad. Haddaad garaash leedahay isticmaal.
- Waxa aad leedahay oo dhan ka saar gaariga.
- Marka aad qaadaysid waxa qiimaha leh, Ka xir xagga dambe. Gaarigana dhigo meel iftiin leh.
- Furaha garaashka fura qari. Meesha hore ee gariga gali ama horay u qaado.
- Halka batroolka lagu shubo u yeel fure si aan batroolka lagaaga xadin.

- Fuaha gaariga lagu wado oo kaliya uga tag qofka gawaarida ilaaliya. Laysinkaagaa iyo warqadaha rajistrashinka gaariga horay uu qaado oo uga tagin qofka gaariga ilaaliya ama gaariga la hagaajinayo.
- Marka aad gaariga meel uga tagaysid luga hore hal dhinac si fiican ugu leexi. Taasi wxay kahortaygaysa in qof gariga ku xada jiidasho.
- Haddu gaariga uu yahay otomaatik horay bareega degdegga kor u qaad marka aad gaariga meel dhigaysid. Haddii uu marsho ku shaqeeyana bareega degdegga kor u qaad adigoo oo marshada hore ama midda dambe gaariga galiya. Marka sidaa la yeelo afarta lugood oo idil way xirmayaan taaso caqabad ku noqota tuuga raba inuu jiito.

Kahortagga Xadista Aqoonsiga

“Xadista Aqoonsiga” waa marka uu qof aan ruqsad u haysan ama sharci u haysan uu isticmaalo warqadaha ama aqbaarta qof kal isaga/ayada oo iska dhigaysa qofkaasi si u wax ku dhaco ama dambiga ku galo. Waa qiyaamada xagga dhaqaalaha ee sida ugu soo kordhaysa Ameerika kuwaaso keena khasaare marka la xisaabiyo bilyaamo badan ah.

- Laysinka gaariga ama soshaal sekuuritiga ha ku qorin jeegaggaaga bangiga.
- Soshaal sekuuritiga iyo waraaqaha dhalashad ha ku qaadan borsda jeebka ama gacanta.
- Hal kaar oo was lagu gato ka badan ha soo qaadan boorsada ha ku qaaadan.
- Rasiyadaka kaarka jexjex. Jeexjeex dokumintiyad ay ku yalaan inta aad turin. Jeexjeex waraaqaha boostada lagu soo dhigo ee kaararka wax lagu soo qaato. .
- Marna qof telefoon kuu soo diray ha siinin lambarka kaarkaaga ama tirada koontada bangiga.

- Boostadaada furo ku xir. Waraaqaha aad diraysid ha ku ridin boostadaada lagu soo dhigo, boostada gayso meelaha boostada laga arruuriyo ku rid.
- Marka aad kaarka amaahda wax ku bixinaysid, garaaniga bar inuu ku weydiyo waraaqahaaga aqoonsiga.
- Sanad kasta, weydiiso kuwa amaahda bixiya inay kuu soo diraan halka uu marayo heerka ay amaahdaada marayso iskana hubso in aqbaarta lagu siinayo ay sax tahay.
- Sawiro kobiya ka samyso waxa kaararka aad jeebka ku qaadatid. Koobiga meel xafidan dhigo.

Sharciyada Kuraasta Celisa Caruurta (MN Stat 169.685)

Caruurta ka yar afar sanadood waa in lagu fadhisiya kuraas celisa oo dhoraya sharciyada federaalka ee ammaanka.

- Kursiga ammaanka in loo rakiba loona isticmaala sida ay u sharaxayaan cidda farsamysay.
- Sharciga waxa loo qoray gawaarida idil ee horay u lahaa suumanaka la xirto.
- Sharciga waxaa loo qoray meelkasto oo la fariisto.
- Dareewalada ayaa masuul ka ah in caruurta si quman u dhawra.
- Kuwa jabiya waxaa la siiyaa ganax yar \$50 (kaaso la cafinayo haadi kursiga lagu ammaanka lagu rakibo muddo 14 cisho).
- Quseeya degganyaahsa Minnesota iyo kuwa kalaba.
- Tuhunka ah inaad kursiga lahayn ayaa sababi kara in gaarigaaga la joojiyo.



Talada Kursiga Rakaabka ee Caruurta Celiya & Kursiga Suunka Koor Loogu Qaado

Khobarada waxay isku raaceen in ilmaha u dhaxeyaa da'aada 4 ilaa 8 sanadood culeeyska uu yahay inta u dhaxaysa 40-80 rodol kana gaabann 4'9" waa inay isticmaalaan kursiga kor loogu qaado oo dhaxda iyo garbaha ku leh suunka kursiga lagula dhuujiyo. Kursiga suunka kor loogu qaado wuxuu kor u qaada halka uu cunuga fadhiisto oo sidaasna jirkooda u roon.

Barnaamijka Lagu Helo Gaari Jaban iyo Kursiga Ammaanka

Waaxda Dabdamiska Plymouth waxay qabanqaabisaa banaamijka gaariga Jabaan iyo kursiga ammaanka. Kuraasta heerka sare oo ay samyso Evenflo Co. ayaa lagu helaa qiimo aad aad u jaban. Aqbaar dheeraad ama sida lagu helo kuraasta gaariga wac 763-509-5198. Jeeg iyo lacag caaddan waa lau iibsana karaa.

Deyrka Lama Ogolo Qalabka Cuntada Kariya

Isticmaalka qalabka cuntada kariya ee ka dhaca deyrka dabaqyada kore am kuwa hoose ee 15 tillabo u jira gurayaha dabaqyada ah lama ogola.

Waa mamnuuc in naftada guryaha lagu haysto ama qol gaar ah. Nafatada baxsata aad bay halis u tahay. Naftada meel lagu hayo waxay dhalin kartaa dab iyo qarax badan.



Oorshaha Gaariga McGruff

Caruurta iyo dadka weynba oo ay la soo xiriiran xalaado naxdin leh ama caawimo u baahan waxaa lagula boorinayaa inay u tagaan gaari jaala ah ee Magaalda oo albaabka ku calaamada McGruff. McGruff Truck waxay wacayaan boliiska oo caawuimo ay siiyaan inta uu boliiska ka imaanayo. Isha ku hay gaariga McGruff Trucks marka aad Magaalada ku mushaaxaysid.



Dhawaaqa Digniinta Dibadda

Digniinta dibadda waxay dhawaaqeeda ka digaysa xaalad halis sida duufaan ama roobab dabaylo wata. Haddaad dhawaaqa maqashid, meel daahson raadso. Radiyaha ama YVga shid si aad aqbaarta ammaanka aad u heshid.

Jaliyadaha waxay Arbacada u horreysa ee bil waliba tijaabiyaan alaadaha digniinta dibadda.

Inta lagu jira tijaabada bil waliba dhacda waxaad maqli doonta laba dhawaaq oo aad u kala duwan. Labadaan dhawaaq ee kala duwan waxay jaaliyadda uga digayaan halis.

- Midda hore, kan sida badan loo isticmaalo, waxaa loogu talagalay dabaylaha iyo hawada aad u xuamata. Digniinta waa dhawa dhegaha u daran. **Marka uu dhawaaqa digniinta dhaco, dhawaaqana u yahay midkaan dhegaha u daran, macnaha waa hawo aad u xun u soo socota. Raadso meel la hoyado sida ugu dhaqsiyo badan oo radiyaha bateriga ku shaqeya daar oo aqbaarta dhagayso.**
- Dhawaaqa labaad waxaa loogu talagalay digniinada noocyada kale waa dhawaaq goos goos ah.


Hadday hawada ay xumaato meesha aad ku nooshahay, waxba digniinta ha ka sugin, durbadiiba aad meel dhisan ku hoyo. Mararka ay

jiraan dabaylo dheeraya waxay ka soo hormari karaan dhawaaqa dadka u diga oo halista ay soo hormarto.

Bandowga Dhalinyarada ee Plymouth iyo Degmada Hennepin

Caruurta ka yar 12 sanadood

Axadda ilaa Qamiista: Waa in la hoydo 9:00 habennimo
Jimcaha iyo Sabtida: La hoydo 10:00 habennimo.



Caruurta jira 12-14 sanadood

Axadda ilaa Qamiista:
Waa in la hoydo 10 habennimo
Jimcaha iyo Sabtida: La hoydo 11 habennimo.

Caruurta jira 15-17 sanadood

Axadda ilaa Qamiista: Waa in la hoydo 11 habennimo. Jimcaha iyo Sabtida: La hoydo 12:00 habennimo.

Plymouth waxay taageertaa bandowga Degmada Hennepin, oo laga dhowro gebi ahaan Degmada Hennepin.

Xadeynta Gawaarida Jidadka Magaalada La Dhigto

Plymouth, gawaarida jidadka loogama tagi karo inta u dhaxaysa 2da ilaa 5ta aroornimo sanadka oo idil. Qaboobaha gawaarida jidadka lama dhigan marka uu barafka da'o yahay 2-1/2 inji oo baraf ah. Gawaarida waxaa dib loo dhigan karaa jidadka marka barafka laga xaaqo jidadka. Ciddi sharcida jabisna gaariga inta la ganaaxo ayaa laga jiidanaya.

Ruqsoyinka Halka Gawaarida La Dhigto

Hadday jiraan xaalado gaar ah sida hawl jidka lagu dhisayo waxa lagu siin karaa ruqsad gaar ah oo aad habeenkii jidka aad gaariga ku dhigan kartid. Boliiska wac 763-509-5160. Si fiican ugu sheeg xaaladda ku haysata waxayna markaasi kuu sheegayaan waxayba gaar kuwaso haddaad raacdid kaa dhowraya in gaariga la gaanaxo.

Tigidhada/Ganaaxa

Haddii habeenkii lagu siiyo ganaax oo ay kula tahay inuu qalada ahaa, waxaad la xiriiri kartaa Waxdaa Boliiska si lagu fasiro sida ay wax u jiraan. Lakiin hal waa inaad xasuusata mar haddi tigidh lagu siiyo Waaxda Boliiska kaama caginayso waxaan jirinna lagama dhigayo. Si arrinkaan lo xalliy waa inaad ballan aad maxkamadda ka qabsatid si aad ula xaaladdaada aad kala hadashid sarkaal hadashid. Isaga ama ayada awood uma laha inay inay tigidhka kaa cafiyaan.

Wareegtada Magaalada ee Ku Taxluuqda Buuqa

Ka Qaybgalka Xafladaha Buuqa Badan.

Qanuunka Magaalada ayaad jabinaysaa marka laga qaybgalo xalfado ay dad buuq badan sameeyaan kaaso dhiba nabadka dariska iyo nashadooda.

Hadduu boliiska uu xaqiyo in xafladda ay buuq badan dhalinayso, askariga wuxuu dadka meesha yimid oo idil ka codsanaya inay isaga tagaan meeshaasi oo laga reebo qofka meesha deggan. Dadka meesha daeggana ama kuwa iska leh hantida waa inay qadaan illaaboyin si ay u joojiyaan buuqaasi.

Waxa aan Habeenkii la Ogolayn.

Inta u dhaxaysa 10:00 habennimo iyo 7:00 subaxnimo, buuqa dibadda laga maqlayo ee ka imaanaya guriga ama guri la ijaaro oo shanqartiisa laga maqo inta u jirta 50 cagood, waxay jabinaysaa qaanuunka Magaalada.

Da'da Sharciga ee Qamriga lagu Cabo Minnesota waa 21 Sano Sigaarkana waa 18 Sano

Sharciga ayaa la jabinaya marka uu qof ka yar 21 sanadood uu qamriga cabo, waa haddi uu usan ku cabin gurigiisa raali ay ka yihiin waalidka dhalay ama ilaalayaha.

Qofka ugu yaraan waa inuu jiraa 18 sano si uu si sharci ah uu u soo iibsado uuna isticmaalo sigaarka.

Qufulka Qoryaha oo Lacag La'aan ah: Qoryaha Meel Ku Xaree

Waaxda Boliiska Plymouth waxay qabaan qorshe lacag la'aan ee lagu bixiyo qufulka qoryaha. Dad waaweyn waxay u soo qaataan deeqdaasi si ay u xafidaan qoryahooda. Faahfaahin dheeraad ah, fadlan wac 763-509-5147.

Qorshaha Digtoonida Caafimaadka ee "File of Life"

Qorshaha "File-of-Life" wuxuu qoysaska uu u ogolaanaya inay



kaydsadaan oo meel ay dhigtaan aqbaarta muhiimka ee caafimaadka ku xafidiyaan hal tayb oo lagu dhajiyo qaboojiyaha. Istiikarka "File-of-Life" waxaa lagu dhejinayaa albaabka hore ee si dadka birmadka ah ay ula socdaan inuu qaboojiyaha uu ku dhegayahay "File". "File-of-Life" ayaa lala soo qaadaya bukaanka oo isbataalka marka la dhigo waxaa loo gudbinayaa shaqaalaha waaxda degdegga ah. Aqbaarta awooda qareenka iyo inaan qofka nolosha lagu soo celin waa lagu dari karaa faylka.

Qorshaha waa bilaash. Laba nooc ee faylalka ah aya la heli karaa. Kuwo boorsada yar ee ragga iyo mid ka wayn ee dumarka. Faylasha weyn waxaa lagu dhejiyaa qaboojiyaha.

Aqbaar dheeraad ah ee qorshahaan dhammaystiraya, fadlan soo wac Waaxda Boliiska 763-509-5147.

ILAHA MAGAALADA PLYMOUTH

Dowladda Hoose

763-509-5000
administration@ci.plymouth.mn.us

City Hall, 3400 Plymouth Blvd., Plymouth, MN 55447, ama wac 763-509-5072. Hadda dhega culustahay, fadlan laynka TDD ka wac 763-509-5065.

Lambarrada Boliiska ee Aan Degdeg Ahayn

763-509-5160 or 763-525-6210
police@ci.plymouth.mn.us

Lambarrada Dabdamiska ee Degdeg Ahayn

763-509-5120
fire@ci.plymouth.mn.us

Dial-a-Ride

Dial-A-Ride waa gaadiid ku gaynaya meesha aad ka rabtid magaalad Plymouth xita ku geeya suuqyada wax laga iibasado ee ka baxsan Plymouth.
763-559-5057
transit@ci.plymouth.mn.us

Qaybta Guriyaynta

763-509-5410
housing@ci.plymouth.mn.us

Lifetime Fitness/Plymouth Ice Center

763-509-0909
icecenter@ci.plymouth.mn.us

Waaxda Beeraha Lau Nasto

763-509-5200
recreation@ci.plymouth.mn.us

Xarunta Plymouth Creek

763-509-5280
plymouthcreek@ci.plymouth.mn.us

Maktabadda Plymouth

952-847-5825

Plymouth Metrolink

Plymouth Metrolink waxay bixisaa adeegyada basas ekisbaress ah ee isku xira Plymouth iyo magaalada hoose ee Minneapolis. Isla adeegyadaas oo kaa soo qaada Minneapolis oo Plymouth kugu soo celiya.
612-373-3333
transit@ci.plymouth.mn.us

Aqbaarta Dib-u-sancaynta

763-509-5513
recycling@ci.plymouth.mn.us

Biilasha Danabka

763-509-5060
utilitybilling@ci.plymouth.mn.us

ILAHA BULSHADA

Guriga Hoyga Bilaashka

Hoyga Bilaashka wuxuu bixiya adeegyo la siiyo dumarka iyo caruurta guriga ladu soo shidayay. Adeegyadaan waxaa kamid hoy la seexdo, leenka shidada oo 24 saacadoo shaqaysa, iyo dad bulshada u dooda.

763 559-4945 24-saacadood
leenka shidada
763-559-9008 Leenka Hawlaha (Hoyga)
763-545-7080 Xafiiska Qorshaha Bulshada
www.homefreeprograms.org

Xiriirka Diimaha & Iskashatada Bulshada

IOCP waa bixiye si toos ugu adeega rubaca degmada Plymouth ee ku taalla koonfur galbeed oo caawisa qoysaska iyo shaqsiyaadka dhaqaalaha hooseeya si ay uga gudbaan dhibaatooyinkii hore kuna helaan ilaha u furaya isku fillaansho.
952-473-2436
www.iocp.org

Prism

Prism waa bixiye si toos ugu adeega rubaca degmada Plymouth ee ku talla waqooyiga oo caawisa qoysaska iyo shaqsiyaadka dhaqaalaha hooseeya si ay uga gudbaan dhibaatooyinka hore kuna helaan ilaha u furaya isku fillaansho.
763-529-1350

Dugsiyada Degmada

763-391-7000	279 Osseo
952-988-4000	270 Hopkins
763-504-8000	281 Robbinsdale
763-745-5000	284 Wayzata

Xafiiska Boostada US

763-557-1372 Plymouth
763-577-1386 Lost Lake

Adeegyada Waayeelka

952-541-1019

ILAHA DEGMADA

Aqbaarta Guud ee Degmada

Hennepin
612-348-3000

Xarunta Dhexe ee Adeegyada

Degmada Hennepin
612-348-8242

ILAHA GOBOLKA:

Aqbaarta Guud ee Gobolka

Minnesota

651-296-0234

Xeerilaaliyaha Guud ee

Minnesota

(651) 296-3353

800-657-3787

TTY: (651) 297-7206

TTY: 1-800-366-4812

www.ag.state.mn.us

ILAHA FEDERAALKA

Waaxda Amniga Qaranka

Adeegyada Sogaletiga iyo

Muwaadinimada Maraykanka

330 2nd Avenue South, 395


Minneapolis, MM 55401

612-348-1306

Xarunta Dhexe Aqbaarta

Federaalka

1-800-688-9889



Plymouth Fire and Police Departments

3400 Plymouth Boulevard

Plymouth, Minnesota 55447

Boliska: 763-509-5160/Dabdamiska: 763-509-5120

www.ci.plymouth.mn.us

"Nolosha Ladnaan Lagu Daro"